

Talaabooyinka 7 Maarso

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid. Bilayska ayaa ku kantarooli kara.

Fiiro gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga internetka ee magaaladaada ama degmadaada.

Maxaa Cusub?

Kuwani waa xeerarka kaliya ee hadda jira:

- Xiro maaskaro afka mar kasta oo aad raacayso tareenka, taraamka iyo baska iyo mar kasta oo aad joogto xarumaha daryeelka, sida cisbitaal ama xarunta daryeelka waayeelka.
- Ixtiraam sharciyada socdaalka.

Maaskarada afka

- Ma jirtaa 12 sano ama in ka badan? Markaa maaskarada afka waa qasab.
 - Marka aad raacayso gaadiidka dadweynaha
 - Marka aad joogto xarunta daryeelka caafimaadka; tusaale ahaan cisbitaalka ama xarunta daryeelka waayeelka
- Ma joogtaa meel dadku ku badan yahay oo mashquul ah. Markaa waxa fiican in aad xirato maaskaro afka.

Safarka dalka dibaddiisa:

- Ma aadaysaa dalka dibaddiisa? Waxa jira koodho-midabo ah(kleurcodes) oo kala duwan.
 - Boore (Grijs): waa deegaan ama dal aan xog badan laga haynin. Waxa fiican in aadan u safrin.
 - Guduud-madaw(Donkerrood): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay sarayso. Waxa fiican halkan inaadan u safrin.
 - Liimi(Oranje): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa dhexdhexaad ay tahay. Halkan waxa fiican in aadan u safrin.
 - Cagaar(Groen): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay hoosayso. Halkan waad u safri kartaa.
 - Ka fiiri bogga internetka <https://www.info-coronavirus.be/nl/kleurcodes-per-land/>
- Dalka aad aadayso xeerarka ka jira ka fiiri bogga internetka ee diplomatie.belgium.be

Haddii aad ka soo laabato wadan ka tirsan Midowga Yurub

Ma soo joogtay in ka badan 48 saac dalka dibaddiisa ?

- Ma haysataa shahaado/cadayn ay ku caddahay in
 - Aad si buuxda talaal u qaadatahay ugu yaraan 14 bari ka hor
 - ama in aad haysato natiijo corona oo lagaa baaray oo taban (negatief) (ugu badnaan jirta 72 saacadood).
 - ama in aad dhawaan qaadday corona (in aan ka badnayn 180 maalmood ka hor)?

Markaa in aan is baarto iyo in aan karantiil gasho midna uma baahnid.

- Shahaado/cadayn ma haysatid? Ma ka timid aag guduud-madow ah ama boore ah?

Markaa waa in aad is baartaa maalinka 1-aad.

Haddii aad ka soo laabato waddan ka baxsan Midowga Yurub

Ma soo joogtay in ka badan 48 saac dalka dibaddiisa ?

- Buux-buuxi warqadan (formulier) aad ka helayso <https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form> inta aanad ku soo laaban Bejamka.
- Ma haysataa shahaado/cadayn ay ku caddahay in
 - Aad si buuxda talaal u qaadatahay ugu yaraan 14 bari ka hor
 - ama in aad haysato natiijo corona oo lagaa baaray oo taban (negatief) (ugu badnaan jirta 72 saacadood).
 - ama in aad dhawaan qaadday corona (in aan ka badnayn 180 maalmood ka hor)?
- Markaa in aan is baarto iyo in aan karantiil gasho midna uma baahnid.
- Shahaado/cadayn ma haysatid? Ma ka timid aag guduud-madow ah ama boore ah? Markaa waan in aad is baartaa maalinka 1-aad.

Marka aad ka soo laabato waddan leh khatar aad u sareysa?

Ma waxaad ka timid aag khatar-tiisu ay aad u sarayso?

- Macluumaad ka guud ee aagagga waxaa laga heli karaa [info-coronavirus.be/nl/hoog-risico-landen/](https://www.info-coronavirus.be/nl/hoog-risico-landen/)
- Kani ma yahay waddan ka baxsan Midowga Yurub?
 - Waa inaad karantiil ku jirtaa 10 maalmood. Tan waxaa laga rabaa qof walba.
 - Isbaar maalinta 1 iyo maalinta 7 kadib markaad ku soo laabato Bejamka.
- Kani ma ka tirsan yahay Midowga Yurub ama aagga Schengen?
 - Ma haysatid shahaado tallaal?
Isbaar maalinka 1-aad ee aad guriga ku soo laabato.
 - Baaritaankaagu ma yahay mid taban(negatief)? Markaa waad ka bixi kartaa karantiilka. Kadib mar kale is baar maalinta 7.

- Baaritaanku ma yahay mid togan (positief)? Waa inaad xayiraad (islatie) ku jirtaa 10 maalmood.

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo. In aad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.